

Sharciga Baabuurta Waddooyinka La joojinayo ee 72-saacadood ee Magaalada Seattle.

Waxaa Magaalada Seattle ka jira calaamado badan oo xadaynaya waqtiga baabuurka waddada la joojin karo (sida xadka 2da-saacadood ee u dhaxaysa 7AM-6PM,iwm).Haddii calaamad la dhigo iyo haddii la dhigi waayaba, sharciga Tiraafigga ee magaaladu ma-oggola in waddada magaalada baabuur la joojiyo in kabadan 72 saacadood. Sharciga Tiraafiggu waxaa kale oo uu mamnuucayaa in baabuurta duugga ah waddooyinka magaalada lagaga tago ([eeg khadka Baarta Laga tagay/ Abandoned Vehicle Hotline](#)).Waxaa kale oo intaa soo raacaya sharciga Dawladda Hoose ee Seattle oo mamnuucayaa in baabuurta ka dheer 80 inji (sida RV-yada, cagaf-cagfata rimoodhka leh iyo baabuurta rarka ee waaweyn) inta u dhaxaysa saqda dhexe illaa 6:00 AM la joojiyo waddooyinka magaalada intooda badan (marka laga reebo waddooyinka ka jira meelaha warshadaha iyo waxsoosaarka) ([SMC 11.72.440](#)). Waaxda Booliska ee Seattle waxay si joogto ah u dhaqangeliyaan shuruucdan, waxaa kale oo ay ka jawaaban cabashooyinka arrimahan la xidhiidha ee shacabka ka yimaadda-fadlan isticmaal taleefooka (206)-625-5011 si aad u soo gudbisid xadgudubyada.

Mararka qaarkood waxaa la beddeli karaa xadaynta caadiga ah ee waddooyinka, sida mararka waddooyinka la xaadhayo, xilliyada hawlaha dhismaha la wado, dhacdooyinka gaarka ahi marka ay jiraan ama marka ay arrimo gaar ah oo uu baahan in waddada laga xoreeyo baabuur taagan. Marka ay tani dhacdo, waxaa la soo dhajin doonaa calaamado rasmi ah (fareem) loogu dhawaaqayo isbeddelada ku-meelgaadhka ee maalmaha iyo waqtiyada aan baabuur joojinta la oggolayn ([eeg Goobaha ku-meelgaadhka ee aan Baabuurta la joojin/ Temporary No Parking Zones](#)). Mararka qaarkood waxaa dhici karta in xadaynta noocan oo kale ah ogaysiiskooda la soo-saaro 24 saacadood keliya ka-hor inta aan la bilaabin dhaqanagelintiisa. Waxaa waajib noqonaysa in baabuurta goobahaasi laga kexeeyo ka-hor intuuusan gaadhin waqtiga la mamnuucay, haddii sidaas la yeeli waayo waxaa qofka baabuurka leh lagu qaadayaa tallaabo ganaax ah, waxaana dhici karta in baabuurka lala wareego oo goobta laga jiido.

In kasta oo ay jiraan dadka qaar aan baabuurtooda si joogta ah u isticimaalin (sidaas-awgeedna waddooyinka iska joojiya), haddana waxaa qasab ah in ay 72kii saacadood ee kasta ay baabuurtooda dhaqaajiyaan oo ay u hoggaansanaadaan dhammaan calaamadaha la soo dhajiyay, oo ay ku jiraan kuwa ku dhawaaqayaa xadaynta baabuur joojinta ee ku-meel-gaadhka ah ee dhaqangelaya 24 saacadood kaddib. Marka baabuur la joojiyo waddo uu dadweynuhu isticmaalo, waxaa dirawaliinta lagu dhiirigelinayaa in ay baabuurtooda hubiyaan ugu yaraan maalintiiba hal-mar, xataa haddii ay waddada baabuurtooda ay joojiyeeni yihiin kuwo la oggolyahay in baabuurta la joojiyo xadka ugu dheer ee magaalada laga oggolyahay ee 72-saacadood ah.

Haddii aad rumaysantahay in baabuurkaaga lala-wareegay, fadlan soo wac (206)684-5444 (Waaxda Booliska ee Seattle). Si aad u ogaatid geeddi socodka la wareegidda, fadlan [eeg khadkayaga Goobta baabuurta laga jiido/Tow-Away Zone Hotline](#).

Si aad u soo sheegtid baabuur la iskagatagay, soo wac (206) 684-8763 ee Waaxda Booliska ee Seattle.

Si aad u heshid xog dheeraad ah oo ku-saabsan sharciga 72ka-saacadood ee baabuurta waddooyinka la joojinayo, soo wac (206) 684 ROAD (684-7623).